

### **Goorma ayay tahay inaad la xidhiidho Waadhka Dhalmada?**

- Haddii aad leedahay garaac joogto ah, ama haddii aad u baahato.
- Markasta haddii ay biyahaagu soo qubteen, iyadoo aan loo eegeyn in fooshu ku qabatey iyo in kale.
- Haddii aad dhiigeysa (xab iyo dhiigg isku qasan waa caadi, iyadoo dhiig yimaado marka afka ilma-galeenku furmo).

**Markasta soo wac Waadhka Dhalmada ka hor intaanad iman, tel. +46 (0)470-58 83 82.**

Xasuusnow inaad soo qaadato aqoonsigaga ID-ga, waxyaalaha la isku nadiifiyo iyo cunto fudud oo aabaha/lamaanehaaga.

### **Nidaamka waxqabadka ee Waadhka Dhalmada**

- Waxaanu isticmaalnaa habka la-joogista, halkaas oo uu ilmahaagu kula joogo maalintoo dhan. Adiga (laftaada) ayaa ilmaha daryeelaaya, iyadoo uu shaqaaluhu ku caawinaayo.
- Haddii ay meel banaantey ayaa aabaha/lamaanehaaga ayuu la seexan karaa ilmahaaga cusub isagoo bixinaaya SEK 150 maalintiiba.
- Quraacda, qadada iyo cashada ayaa lagu bixiyaa qolka maalinta. Haddii aabaha/lamaanehaaga uu idinla seexdo, dhamaan cuntadu way ku jirtaa.
- Markaad ku jirto Waadhka Hooyoyinka/ Waadhka Dhalmada, adiga iyo ilmahaaga ayaa xidhan kara dharkiina.
- Ma isticmaali kartid telefoonka xiliga foosha. Waadhka Dhalmada ayaad ku isticmaali kartaa telefoonkaaga.
- Haddii aad doonayso ilmahaaga cusub walaaladii ama qoyska iyo asxaabta intooda kale inay ku soo booqdaan, waxaad ku arki kartaa banaanka waadhka. U sheeg cida ku soo booqanaysa wakhti iyo goobta kulanka iyadoo aad ka dalbato inay halkaas kugu sugaan.

- Sabab amaanka ah awgeed ayaanu u xidhnaa albaabada banaanka ee Waadhka Hoyada/ Waadhka Dhalmada. Waa inaad saxeeexo markaad baxayso oo aad halkaa ku isticmaasho kaadh.

Waadhku waxa kale oo uu leeyahay dhowr sariirood oo loogu talo galay bukaans socodka cudurada haweenka qaba.

**Waadhka ma soo galin kartid ubax, iyadoo la ixtiraamaayo dadka qaba xasaasiyada.**

### **Waadhka Qoyska Hoyada (FamiljeBB)**

Waadhka Qoyska Hoooyada (FamiljeBB) waxa loogu talo galay dumarka carruur si cadi ah u dhalay oo leh ilme caafimaad qaba oo naaska la nuujiyey kadib markuu soo dhashay. Dhalmada ka dib, waxaad joogaysaa waadh caadi ahaan ilaa 4-6 saacadood ka hor intaanad tagin Waadhka Qoyska Hoyada. Marka aad halkaa joogto, waalidiinta (waalidka) ayaa masuul ka ah inay sariirta hagaajiyaan oo ay qolka nadiifiyaan. Waxaad halkaa ku isticmaali kartaa telefoonkaaga.

Ilmaha yar walaaladii ayaa halkan ku soo dhawaan kara. Marka laga reebo taas, lamaane kasta waxay heli karaan laba marti, iyadoo bukaan socodka kale la ixtiraamaayo. Waadhka Qoyska Hooyada waxa uu leeyahay umuliso halkan ka shaqeysa maalintii iyo sidoo kale kalkaaliyo carruurta oo 24 saac maalintii shaqeysa. Xiliga booqadshadu qaraabad kale waxa weeye inta u dhaxaysa 9.00 iyo 21.00.

### **Guriga dhakhso u aadeyso**

Haddii adiga iyo ilmahaagu aad wanaagsan tihiin, ayaa caadi ahaan lagaa sii deyn karaa Waadhka Hooyoyinka/ Waadhka Dhalmada ilaa 48 saacadood umusha gudaheed. Booqashada ka warhaynta waxa lagu sameeyaa Waaxda ka warhaynta ee Waadhka Qoyska Hoooyada. Haddii loo baahdo, dhakhtarka carruurta ayaa sameyn baadhitaan caafimaad oo labaad oo ilmahaaga ah. Waxa kale oo ay ku siisaa fursada aad su'aalo umusha ku sabsan ku weydiiso iyo inaad caawimo ka hesho naas nuujinta.

Baadhitaan PKU ayaa la qaadaa marka uu ilmahu yahay 48 saacadood jir. Dabcan, waxaanu tirade ku darsanaa caafimaakaaga iyo ka ilmahaaga, laakiin sidoo kale waxaanu eegnaa dalabkaaga shakhsiga.

### **Haddii ilmahaagu uu u baaan yahay daryeel daawo**

Carruurta dhiciska ah ama u baahan daryeel daawo oo isla dhalhada ka dib ah oo sabab kale oo kasta ah ayaa lagu daryeelaya Waadhka Dhalaanka. Dadka halkaa ka shaqeynaaya ayaa aqoon gaar ah oo qeybtan ah leh. Xiliga daryeelka iyo daryeelka la bixiyey waxay ku xidhan yihiin xaalada daawo ee ilmahaaga. Shaqaalaha waxa uu bixiyaa gargaarka iyo tilmaanta loo baahan yahay. Laakiin waa waalidiinta cida ugu wanaagsan ee daryeelaya ilmahooga. Iyo sidoo kale Waadhka Dhalaanka, waxa kale oo aanu bixinaa daryeelka guriga iyo daryeelka dibada cusbitaalka si aanu ula socono daryeelka carruurta dhiciska iyo carruurta xanuunsanaysa ee soo dhalatey.

### **Xidhiidhka**

Waxaad soo wici kartaa khadka telefoonka ee naas-nuujinta,  
tel. +46 (0)470-58 84 20 inta u dhaxaysa 14.00 iyo 15.00 maalin walba.

Xiliga fiidka iyo habeenkii, ayaaad soo wici kartaa Waadhka Hooyoyinka/ Waadhka Dhalhada,  
tel. +46 (0)470-58 80 08 wixii tallo ah.

## **Ku soo dhawow Waadhka Hooyada/ Waadhka Dhalhada ee Växjö Waadhka Hooyada/ Waadhka Dhalhada ee Växjö**



*In ilme la helo ayaa ah mid ka mid ah wahtiyada ugu fiican nolosha*

Waxaanu rabnaa waalidiinta iyo carruurta soo dhalatey inay dareemaan in xanaaneeyey oo la daryeelay. Waxaanu sameynaa wax kasta oo aanu sameyn karno si aanu wakhtigan kaaga dhigno sida suurtoagal ahaan ugu wanaagsan.